

# Sannadkii hore Ma bixisay Kiro? Mus Thov Koj Qhov Credit! Dalbo Dib usoo Celin!



## Maxaan u baahanahay si aan u dalbado Dib ucelinta?

Waxaad u baahan tahay cadeyn Shahaadada Kirada La Bixiyay (CRP)

- Mulkiilahaaga ama wakiilkaaga maamulaha waa inuu ku siyo CRP ugu dambeyn 31 Janaayo, 2025
- Wuxaan heli doontaa hal CRP qeyb kasta oo aad sannadkaas ka kiraysatay

## Sideen u dalban karaa Dib usoocelinta?

Waxaad dib ucelinta ku dalbanaysaa adiga oo buuxinaya Foomka M1, Canshuur Celinta Dakhliga Shakhsiyeed. Waa inaad ku dartaan nuqulka CRP-yadaada, haddii kale dib-u-dhac ama diidmo ayaa laga yaabaa inay timaado.

- **Elektaroonik ahaan:** U isticmaal software-ka canshuurta si aad khadka tooska ah uga soo dirto canshuur celinta dakhligaaga Minnesota.
- **Boostada:** Booqo [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) si aad u soo degsato ooaad u buuxiso Foomka M1, Jadwalka M1REF, iyo Jadwalka M1RENT. Noogu soo dir canshuur celintaada oo dhammeystiran oo ku dar nuqul kasta oo CRP-yadaadii sannadkii hore.

## Goormaan Dalban Karaa?

Waa inaad dalbataa ugu dambeyn 15Abriil, 2025, si aad uga fogaato ganaaxyada. Haddii aan lagaa doonayn inaad canshuurta dakhli soo gudbiso, waxaad haysataa  $3 \frac{1}{2}$  sano laga bilaabo taariikhdaas si aad u dalbato lacag dib usoocelinta kiraystaha.

## Walbahaarka caamka ah ee Dib usoocelinta Kiraystaha

### Ma aanan helin CRP ama waxaan u baahanahay in keyga la saxo.

La xiriir mulkiilahaaga ama wakiilkaaga maamulaha oo ka codso inuu saxo ama ku siyo CRP-gaaga. Haddii aysan sidaas yeelin, naga soo wac 651-296-3781 ama 1-800-652-9094.

### Dakhligaygu wuu ka yaraaday kirada guriga ee la bixiyay.

Waxaad weli dalban kartaa dic usoocelinta. Markaad soo gudbiso canshuur celinta dakhli ee Minnesota, waa inaad ku dartaan sharaxaad sida aad u heshay lacagaha aad ku bixisay kiradaada. Tani waxay sidoo kale khuseysaa haddii khadadka 1 ee Jadwalka M1RENT uusan la mid ahayn dakhligaaga guud ee la hagaajiyay ee federaalka ee khadka 1 ee Foomka M1.

### Waxaan qabaa su'aalo kale.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan dib usoocelinta Kiraystaha ama habka cusub ee CRP, booqo boggayaga internetka [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) oo gal.